

CORONAVIRUS

Maxay Turnhout samaynaysaa?

Wixii macluumaad ah ka raadi www.turnhout.be

Wixii su'aalo ah kala xiriir vragen@turnhout.be amma 014 40 96 66



Dadweynaha magaalada degan ee sharafta leh

Waxa aan isku dayaynaa in aan joojinno faafidda fayraska Corona. Sidaas awgeed waxa qasab ah in talaabooyin adag la qaado, balse waan ku qasbannahay. Waxa aan u baahannahay kaalinta qofkasta oo Reer-Turnhout ah.

Naftaada ka war hay dadkana iska war haya

Ku ekow guriga

- Banaanka waxa aad aadaa marka runtii baahi jiroto oo kaliya: in aad soo shaqayso, in aad cunto soo iibsato, in aad farmashiyaha aaddo.
- Banaanka in aad dhaqdhaqaaq amma nasasho u aaddo waa la ogolyahay, Balse aad banaanka kalidaa, amma raac qof qoyskaaga ka mid ah amma hal qof oo saaxiib ah (isla qof kaas uun mar kasta israaca)

Masafo ha idiin dhexayso

- Dadka ha idiin dhexayso ugu yaraan 1.5 m. Haddii qof aad kuugu soo dhawaado. Si naxariis leh ugu sheeg in uu kaa durko.
- Ha balaminin dad kale, ha samayn koox, marti ha qaabilin. Xusuusnow in sidoo kale fayraska aad faafinkarto xataa adiga oo aan xanuun qabin.

Waxba kayd ha u soo iibsaniin

- In wax kayd loo soo iibsado looma baahna: waxa jirta cunto iyo daawo qofkasta ku filan. Sahayduna waa joogto lahubo.
- Is xushmeeya oo dukaamada ha dhamaynina. U ogolow qofka kale qaybtiisa.

Gacmaha dhaqo

- Gacmaha si joogto ah biyo iyo saabuun ugu dhaqo. Ugu yaraantii markasta haddii aad banaanka aad aado gacmaha dhaqo, haddii aad cunto karinayso, haddii musqusha aad tagtay.

Ilaali bukaanka u nugul jirada

- Dadka nugul si guud uga war hay, wac, adeeg ugee oo iridda u dhig, u dir warqad amma sawika gacanta la gu sawiro ee caruurto mu sawiraan. Balse iska ilaali xiriirka fol-ka-fool-ka ah..

Raac tilmaamaheenna.

Maadaama tilmaamuhu si joogto ah ay isku badalayaan, waa qasab in marar badan la hagaajiyo. Bogga internetkeenna www.turnhout.be markasta waxaad ka helaysaa warbixintii ugu dambaysay. Sidoo kale waxaad la socon karta Facebook Stad Turnhout.

kombiyuuter ma haysatid?

Na la soo xiriiri maalmaha shaqada inta u dhexaysa 8 iyo 18 saac oo soo wac lambarka **014 40 96 66**

Walaaladu way iska war hayaan.

Talaabooyinkan adag waxa ay sababeen in dad badan marba maka ka sii dambaysa kali dareemaan. Waa hadda xiligii la isku xirnaan lahaa la is booqan lahaa hab la isa siin lahaa. Balse erayga wanaagsan iyo in wax yar la iska war hayo waxay noqon kartaa cawimo iyo dhiirri gelin. Ku xiriira baraha bulshada, u diira fariimo

gacaltooyo dadka xaaladdu ku adagtahay. Soo mar dariishadda waaliddadaada waayeelka ah oo gacanta u haadi

Mal lacag la'aan baad tahay, ma kali baad tahay kaalmo u baahan oo cidna haysan? Haddii ay sidaas tahay soo wac lambarka **014 47 11 00** ee Welzijnsonhaal amma lambarka lacag la'aanta ah **0800 13500** ee CAW. Waxa lagu waydiin doonaa bostkodhkaaga, ee u sheeg **2300**.

Waxa aan aaminsanahay in midnimada iyo dulqaadka Turnhout sarayso iyo in Reer-Turnhout xal u helayaan in ay is kaalmeeyaan. Waan iska war haynaynaa. Iyo sidoo kale maamulka degmadu idin dayici maayo wuxuuna qaadi doonaa talaabo kasta oo loo baahi qabo in dhamaantiin amnigiinna iyo caafimaadkiina lagu sugo. Waan indin ka war haynaynaa.

Samir badan u yeesha xiliga adag waxaanan u soo jeedinaynaa mahad naq diiran dhamaantiin si aad isu caawisaan deganaashahana u ilaalisaan.

Waxaan rajaynaynaa in degdeg markale aan isku aragno, haddii wax walba sidan ay ka fiicnaato oo markale ay suurto gal noqoto in aan ku raaxaysanno magaalo-waynteenna.

Aniga oo ku hadlaya magaca guddiga duqa magaalada odayaasha iyo dhamaan adeegga magaalada.

Filip Buijs
Maamulaha guud

Paul Van Miert
duqa magaalada

Macluumaad dheeri ah

• Ma jirantahay?

- Ma qabtaa su'aalo guud oo la xiriira fayraska Corona, wac markaa lambarkan **0800 14 689** amma fiiri bogga internetka www.info-coronavirus.be
- Ma ka cabanaysaa dhuumaha neef mareenka amma ma qabtaa cillad caafimaad oo degdeg ah?
 - [Isniinta ilaa iyo qamiista inta u dhexaysa 8 iyo 22 saac](#)
Wac diktoorkaaga
 - [Jimaha laga bilaabo 8 ilaa 19 saac](#)
Wac diktoorkaaga.
 - [Habeennada shaqada marka laga reebo habeenak jimcaha](#)
Wac huisartsenwachtpost: **014 410 410**. Gacanta ku hayso lambarkaaga (rijksregisternummer).
 - [Habeenka jimcaha 19 saac ilaa subaxda isniinta 8 subaxnimo saac](#)
Wac lambarka **014 409 609**. Gacanta ku hayso lamberkaaga gaarka (rijksregisternummer)

• Ma qabtaa su'aalo kale?

- Su'aalaha la xiriira caafimaadka xaaladda guud: **0800 14 689**
 - Su'aalaha la xiriira dhaqaalaha: **0800 120 33**
 - Su'aalaha la xiriira talaabooyinka Turnhout qaaday: **014 40 96 66**
-